Masar Waxa ka Dhacay iyo Casharka ku Jira

Qore: Rashiid Sheekh Cabdillaahi(Gadhweyne)

16 Sibteembar 2011

Masar si baa loo yaqaanay oo loo sifayn jiray. Waxaa dhacay wax ka duwan oo wixii la yidhi ba in ay buriso u dhow. Maxaynu kala soo bixi karnaa ee ah murti looga faa'iidaysan karo caynaaninta socotada taariikheed ee horteenna ah? Marka hore aynu eegno waxa dhacay iyo maxaa la odhan jiray ee shakhsiyadda Masar lagu tilmaamay.

Tuunis bay ka bilaabantay, Masar baa ku xigtay, ka dibna badanka adduunka carabta ayey si weyn u saamaysay. Masar, Liibiya, Yemen, Albaxrayn iyo Suuriya ayey ka wada oogsatay. Waa kacdoon dadweyne oo aan la filaynin. Waxaa ifafaale ah sida ay Tuunis uga bilaabantay iyo lama-filaanka ay keentay. Buucaziiz wuxuu ahaa, baa la yidhi, nin dhallinyaro ah oo jaamacad ka baxay, ay se shaqo la'aani badday in uu gaadhi-ximaar ku dul-iibiyo khudrad oo uu suuqayada la meero, si waxa yar ee uu ka helo, uu ugu quudiyo qoyskiisa saboolka ah. Ciidanka Booliska ayaa ugu yimid koobtii uu ganacsigiisa yar ku hayyey; gaadhi-dameerkiisii iyo wixii saarnaaba waa ay ka qaadeen oo la wareegeen. Haddii uu ka daba-tegey oo uu ku noq-noqday meeshii la geeyey iyo ciddii ka haystay gaadhiga looxa ah ee alaabtu u dul-saarnayd, wuxuu la kulmay diidmo qayaxan, af-lagaaddo iyo tacaddi gacanta ah. Xaaladda uu ninkaasi galay waxay gayeysiisay in uu nolol ba dhammaanteed ka quusto oo uu dhinac iska dhigo. Koobtii buu isku gubay oo ku dhintay. Shaki ma laha oo Binu Cali iyo xoogaggii madax-jebinta dadka u qaybsanaa wax shiddo ah iska ma ay gelin ninka is-gubay, xaadina uga ma dhaqaaqin dhimashadiisa. Waayo ma ay filaynin waxa dhacdadaas ka dab-yimid ee jiritaankii taliskooda soo afjartay.

Tuunis baa isla oogsatay, boqollaal kun baa soo debed-baxay oo maalin oo dhan hadhsan waayey, habeen idilkiina hoyan waayey. Ciidammadii amniga ee argagixinta iyo cabsi-gelinta u jabsanaa ayaa xadhig iyo rasaas ba u nacay. Hayeeshee dadku dadkii ay bajin jireen noqon waa; finkii naxdintaa bogsaday; sidii ay filayeen xaalku ma aha. Malaayiin aan dhimasho ka cabsanaynin ee raasta laabta u dhigaya ayaa tirada keli ah ku hafiyey ciidankii gaashaanka u ahaa Bin Cali iyo kooxdiisa talo-maroorsiga. Ifafaalaha dareen-jiidashada leh ee meesha ka muuqaday waa dhawr ammuurood oo ay ka mid yihiin baaxadda dadweynaha bananan-baxaya; waa kaalinta laf-dhabarka ah ee ay dhallintu kaga jirto; waa adeegsiga qalabka teknolojiyda casriga ee enternetka ee in badan jebisay awooddii xakamaynta iyo cabbudhinta xukunnada talo-maroorsiga; waa sabirka, dhabar-adayga iyo ku-adkaysiga hadafka aan dib looga soo labaanayn. Waxaa intaas oo dhan dheer oo aad u muhiim ah mabda'a iyo yoolka halganka ku arooraya qaddiyada xorriyada, dimoqraaddiyada iyo majaraha bannaan-baxa dadweyne ee si kasta oo loo caracareeyo ku dheggan halku-dhegga nabadgelyada ah.

Wax badan baa beenoobay; derbiyo waaweynaa baa dumay, wax badan baa sidii loo haystay iyo wixii laga qabay noqon waayey. Maxay dawladaha Maraykanka iyo gebi ahaan ba reer galbeed u taageerayeen xukunno wada keli-talis ah oo xorriyada, dimoqraadiyadda iyo xuquuqda dadnimo ku liddi ah? Waxay jawaabtu ahayd, dalalka carabta iyo

Copyright © 2011 WardheerNews.com

dhammaanba islaamka is-beddel dimoqraaddi ahi ka ma iman karo; xarako dadweyne oo dimoqraaddi ahi ka ma abuurmi karto; waxaa qudha oo ka dhex-abuurmi karaa waa kooxo islaami xag-jira ah oo argaggixiso, nooca Qaacida ah. Sidaad owgeed bay yidhaadeen, taageerada keli-taliyeyaashu waa lagama-maarmaan. Waxaa kale oo la yidhi dadyowga carabtu waa dad weligood ba ku noolaa madax-jebin iyo xukun midiidinsiga dadkiisa ku dhisan; waa na dad aan xorriyada iyo talo-wadaag midna dhaqan u lahayn; waa dad aan, sidaad darteed madaxdooda marna ka hor iman doonin. Giddi waxaaas oo dhan maanta maxaa ka jira?

Intaasi ba waa iga araar ee meesha aan qoraalkan kooban la maagay ee aan u dan-leeyaha waa Masar. Tilmaamaha aan kor ku xusay waxay in badan ku run yihiin Masar. Qarniyo ayey socotaa inta dadka reer Masar laga warramayo ee lagu sifaynayo dad saan adag oo aan is-beddelin. Xusni Mubaarak tani 1983kii, ayuu Masar ka madaxweyne ahaa; waxaana uu ku xukumayey musuq, cabbudhin iyo xuquuqda dadnimo oo uu si walba ugu gabood-falo, la mana filaynin in uu geeri wax aan ahayn, xukunka kaga tago; ayadana waxa uu ugu gogol-xaadhayey in uu wiilkiisa dhaxalsiiyo xukunka; wax baajiyaa na ma muuqan la mana eegeynin. Adduunka carabta dhammaantii laga ma eegeyn in madaxdiisu xukunka kaga tagaan wax aan ahayn afgembi millatari, geeri ama, haddi kale, dullaan debedeed, sidii ku dhacday Saddaam Xuseen.

Xaaladda Masar Gaar ahaanteed

Masar waxay dadkeedu yidhaahdaan *Ummu Dunyaa* oo macnaheedu yahay Hooyada Dunida. Ereyga Masar ama, sida saxa carabiga ah, *Misra* laba wax baa dadkeedu u wada yaqaan. Ka hore waa magaca siyaasiga ah oo tilmaamaya dalka dhammaantii; ka kale na waa macanaha shacbiga ah ee ka madhan is-ahaanta siyaasadeed ee dalka, kaas oo ah magaalada Qaahira. Haddii aad, tusaale ahaan, joogto Eskandariya(waa sida magaca dadkeedu u dhawaaqeene) ninka Qaahira u safrayaa wuxuu ku weydiin maxaddada tareenka Masar tegaya(wuxuu uga jeedaa Qaahira tegaya). Sidaas darteed *Misra Ummu dunya* marar badan baa looga jeedaa Qaahira oo keli ah. Islaan aannu la jaar noqonnay aniga iyo arday kale, ayaa maalintii u horrasay ee ay na argato ku celcelisay labadaa erey ee ah Misra *Ummu Dunyaa*. Beri dambe oo aannu is-baranay, ayaan weydiiyey oo aan idhi Ummu Maxamed, maxaad uga jeedday *Misra Ummu Dunyaa*? Waxay ii tirisay bani-aadamka adduunka ku nool, inta midab ee uu leeyahay ee caawa magaalada Qaahira ku soo hoyatay. Masar, bay tidhi(Qaahira), waa meel quruumaha dunidu ku soo qulqulayaan. Dadka reer Masar, kooda aanay waxbarashda casrigu rujinnin ee aanay dhul shishe iyo xataa dalka debeddiisa geynin, waa dad dhulka ku dheggan oo meeshii ay ku dhasheen ku dhinta. Ummu Maxamed waxaan filayaa in ay cumrigeeda ku laasatay xaafadda Caabidiin ee ku taal Qaahira; sidaas darteed, iyadu, meesha caalamka kulmisay ee ay ku aragtay dadyowga kala midabka ah ee dunida, waa Qaahira. Qaahira ayaa u ah '*Misra* Ummu Dunyaa'.

Waagaa (lixdannadii qarigii labaatanaad), waxaan u haystay *Misra Ummu dunyaa* in tahay wax ka yimid ama ka dhashay xaaladda is-weyneynta iyo nerjisiyada Masaarida. Si kasta ba ha noqotee, ma aha odhaahdu tu ku doodaysa ama sheeganaysa xaqiiqo cilmiyeed; bal se waa odhaah qaab suugaaneed ugu duur-xulaysa ujeeddo kale. Taariikhda kumannaaan sannood, wax badan baa Masar ka dhigaya *Ummu dunyaa*. Ka soo bilow Nebi Ibraahim(c.s) iyo waayadii Kancaaniyiintii;

Copyright © 2011 WardheerNews.com

xadaaradahii Misobotaamiya, Ashuuriyiinta iyo somariyiinta, Giriiggii hore iyo waagii *Alexander the great;* Imbraadooriyadii Romaaniyiinta; soo-ifbixii dawaladdii Carabta ee u horraysay iyo fiditaankii Xadaarada Islaamka; Mowjadahii Maguulkii ama Tataarkii bari fog ka yimid ee khilaafadii Bagdaad cagta mariyey ee Shaam jiidhay Masar na sigay; Mamaaliiktii iyo Imbiraadooriyadii cusmaaniyiinta ee ka dambaysay, ee ayana muddada ilaa afarta qarni ah ama ku-dhawaadka ah Caalamka Islaamka badidiisa xukumayasay; ilaa dawladaha Yurub ee casrigan oo Masar ku loollamayey tan iyo dhammaadkii qarnigii siddeed iyo tobnaad, intaba Masar waxay ahayd meel u ban-taalla soo-gelitaanka dad dhul kale ka yimid oo dullaan dagaal iyo nabad ba ku soo galaya. Ma jirto meel weligeed adduunka looga socod badnaa. Dadkeeda maanta ku nooli, luqo ahaan iyo haddii la doono, dhaqan ahaan, waa carab; dhiig ahaan se waa dad ka soo kala jeeda qaarradaha saddexda ah ee adduunkii qadiimka ahaa.

Masar iyo Webiga Niil:

Masar waxay leedahay wax badan oo la la yaabo. Marka la soo qaado waxyaabaheeda yaabka leh, waxaa u horreeyo oo kugu soo dhacaya, tusaale ahaan, ahraamta Jiiza oo lagu tiriyo kuwa u mudan todobada cajaa'ib ee dunida; waxaa ka mid ah cajaa'ibkeeda timthaalka Abulhowl iyo raadadka Waadi Almuluuk iyo Macbadka Abu Sambal; waxaa kale oo kugu soo dhacaya in badan oo ka mid ah raadadka taariikhda Qibdiga iyo Islaamka oo ayaga na Masar ay hodan ku tahay. Waxaa kale oo la yaabkeeda ugu weyn ka mid ah xidhiidhka ay Masar la leedahay webiga Niilka(River Nile).

Taariikhyahankii magaca weynaa ee Giriiggii hore, ee la odhan jiray Herodotus ayaa laga hayyaa weedh can-baxday oo ah: *Masar waa deeqda Niilka(Egypt is the gift of the Nile).* Herodotus wuxuu noolaa oo uu hadalkaas bixiyey qarnigii shanaad, ka hor dhalashadii nebi Ciise. Maanta haddii aad Masar tagto, toos bay ereyadaasi kuu dhaygag-gelinayaan. Odhaah kale oo Herodotus loo celiyaa waxay tidhaa: *Masar waa dhul ay dadka Masaaridu ka kasbadeen oo uu siiyey webiga Niil (Why Egypt is The Gift of The Nile; Wikipedia free incycolopedia).*

Wabiga Niil wuxuu leeyahay laago badan oo isu yimaadda, waxaa se u mudan laba laagood. Laagta hore oo ah ta u dheer waa Niilka Cad(White Nile); ta kale oo ah ta u muhiimsan xagga biyaha iyo xagga dhoobayda carro sanka ah waa Niilka buluukiga ah oo asagu ka yimaadda warta Taana ee ku taal dalka Ethiopia. Ka hore, dalal dhawr ah baa biyahiisa wadaaga. Waxay biyihiisu ugu horraynta ka yimaaddaan soo na maraan dalka Ruwanda iyo dalka Tanzaniya. Waxay biyahaasi ku soo shubmaan warta weyn ee Viktoriya ee ay wadaagaan dalalka Uganda, Tazaniya iyo keynya. Halkaas ayaa uu magaca webiga Niil ka bilaabmaa. Guud ahaan biyaha labada webi waxaa wadaaga dalalka Ruwaanda, Tanzania Ugaand, Ethiopia, iyo Sudaan oo ayana hadda dal kale ka go'ay iyo Masar oo uu aakhirka xeebteeda Badda Cad ku biyo-shubo. Waxaa la yidhaahdaa waa webiga Afrika iyo adduunka ba ugu dheer (waxaa lagu qiyaasaa 6670km).

Masar mooyee dalalka kale midna lagu ma sheegin, lagu ma na sheegi karo in uu yahay deeqda webiga Niil. Masar oo keli ah ayey weedhaasi ku rumowdaa. Masar sida ay u dhan tahay waa saxaare bar robaad wax aad u yar taqaan, wax na ka bixin; nolosheedu dhammaan waxay ku xidhan tahay webiga Niil, la'aantiina dal iyo dawlad Masar la yidhaa ma jirteen. Taas ayey ku fadhidaa weedha Herododus ee ah *Masar waa deeqda webiga Niil*. Waxaa kale oo Laagtan webiga la yidhaahdo A-niil Alazraq (ka timaadda Ethiopia) ay Masar keentaa dhoobo-madowda carro-sanka ah ee uu ka koobmo dhul-beereedka lagu nool yahay, taas oo ay ku fadhido ilbaxnimada Masar iyo dhismaha dawladnimadeedu ba. Taasi na waa murtida ay tusaalaynayso odhaahda kale ee uu Herodotus leeyahay: *Masar waa dhul ay dadka Masaaridu ka kasbadeen oo uu siiyey webiga Niil.*

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Fataha biyaha webiga ee sanadkii xilliga roobabka, Ethiopia ka yimaadda ayaa ah deeq Alle oo webigu keeno.

Dalalka kale ee webigu maro, mid walba ballaadhkiisa waa lagu nool yahay, Masar se waxay ku ururs an tahay oo dadkeedu ku dhaqan yihiin, ilbaxnnimadeeda iyo taariikheedu na ku fadhidaa inta biyaha webigu gaadhaan. Haddii uu degaanka jaqoraafigu dhismaha bulsheed saamayn ku leeyahay, waxay ka muuqataa oo laga daalacan karaa xidhiidhka Masar la leedahay webiga Niil. Taas owgeed in kasta oo biyaha webiga, boqolkiiba labaatan keli ahi maraan Masar, inta kalena marto dalal kale, hadda na magaca Niil Masar buu gaar ugu xidhiidhaa oo marka la soo qaado lagu xusuustaa; waayo marka aad maqasho Niil, Masar oo qudha ayaa kugu soo dhacaysa.

Waxay arrintani saamayn weyn ku yeelatay bulshada halkaas ka abuurantay oo noqotay bulsho beeralay ah oo dhulka si aad ah ugu dheggan, iyo mushkilad taas la xidhiidha oo ah sidii biyaha loogu qaybin lahaa dhul beereedka kooban ee hareeraha webiga ku dhereran. Waxaa ka soo baxday baahida culus ee loo qabo awood dhexe oo dawldeed oo masaladaas gacanta ku qabata. Marka laga soo bilaabo qarnigii 31aad ee dhalashadii Nebi Ciise ka hor, waxaa Masar ka jiray dawlad dhexe oo ay awooddu, si buuxda, ugu ururs an tahay gacanta Keli-taliyaha(Fircoon) aan ereygiisa dhul la dhigin. Awoodda xooggan ee xukunka dhexe waxaa khasbay waa bulshada beeratada ah ee dad iyo xoolo ba, u baahan suldad adag oo u qaybisa dhulka carro-sanka ee kooban iyo biyaha webiga maraya. Waxaa iyana meeshaas ka dhashay xadaarad maaddi iyo ruuxi ah oo ku dhereran webiga jiinkiisa inta uu fatahiisu gaadho. Raadadka ama hadhaaga xadaaradani waxa ay ku tusayaan heerka awoodda xukunka la wareegay kartidii muruq iyo maskaxeed ee dadka, taas oo dhistay haramyada, macbadyada iyo timthaallada la yaabka badan ee adduunka maanta, meel walba looga soo daawashada tago. Dhammi astaamaha xadaaradaasi waxay ku dhereran yihiin hareeraha webiga. Ku darso saamaynta uu webiga Niil ku lahaa ganacsiga iyo isu-socodka dadka masar gudaheeda iyo Masar iyo debeddeeda, taasoo uu weligii ba ahaa gaadiid iyo is-gaadhsiin ba. Ilaa maantadan oo uu horumarka aadamigu samaawaadka koonka u gudbay oo teknolojiyada casrigu dadyowga adduunka isu soo dhawaysay, Masar waa deeqda webiga Niil; la'aantiina habeen lagu ma noolaan karo. Sideeda ayey hadal-haynta webiga Niil ugu badan tahay odhaahaha soo-jireenka ah ee aad had iyo jeer ka maqli karto dadka caadiga ah ee Masaarida. Ummu Maxamed waxay aragtay kuwo naga mid ahaa oo ka dib markii ay tacliintoodii dhammaysteen, safar dalkoodii u xidh-xidhay. Waxay tidhi: 'miyaad tegeysaan'? ' haa' bay yidhaadeen ' ee nabad-gelyo'. Waxay tidhi: 'biyaha webiga Niil qof cabbay, had ay gaadhaba wuu soo noqon'. Waa fikradaha shacbiga ah ee dadka caadiga ahi yidhaahdaan.

Masar iyo Masaaridana

Masar muddo qarniyo ah ayaa daraasooyin dhinacyo badan leh lagu sameenayey. Ka sokow culamada Masaarida, waxaa cilmi-baadhis badan ku sameeyey kuwo reer galbeed ah. Daraasooyikaas waxa ka mid ah kuwo ku saabsan shakhsiyadda masaarida.

Ereybixinta shakhasiyaddu, asalkeedii hore, waxay ka soo jeeddaa cilmiga seykolojiga oo waxay tilmaamaysaa astaamaha nafsiga ah ee ay keli qofeed leedayahay. Halkaas ayaa cilmiga bulsheedkuna(sociology) ka soo qaatay ereybixintaas oo uu ku dabbaqay sifaalayaalka nafsiga ah ee guud ahaan, dadka isku bulshada ah ka muuqada ee noqon kara tilmaamo guud oo dadkaas ka dhexeeya. Isla markii, waa kuwa noqon kara astaamo dhaqameed laga daalacdo fal-dhaqanka dadkaas. Guud ahaan, waxaynu odhan karnaa waa Sifaalayaasha uu ka samaysmo namad ama namuunad iyo sansaan dhaqameed bulsheed iyo seykolojiyadeed oo ummad lagu tilmaasan karo. Tusaale ahaan waa innaga oo bulshada reer-guuraaga soomaaliyeed ku tilmaanna in yahiin dad magaca qabiiladooda si weyn ugu qiirooda oo nafta u hura; waana dad ay tolliimada qabiil wax walba kala weyn tahay. Waa dad neceb in cidi awood iyo suldad ku muuqunayso oo had jeer doona in ay

Copyright © 2011 WardheerNews.com

sida ay jecel yihiin yeelaan, taasoo ah in qofku, haddii uu doono, wadarta tolkii u hoggaansamo aanuse jeclayn in uu qofna ba madaxa hoos ugu rogo.

Masaarida Waxaa la yidhi oo muddo laba qarni iyo dheeraad ah lagu celcelinayey, waa dad aad u sabir badan oo dhibaato kasta u adkaysta; waa dad mashaakilka ka hor yimaadda qadder Alle ku dhaafa oo iska suga in ay si uun isaga xallismaan; waxaa carrabkooda ku badan odhaahaha: "inshaa Alla" iyo "maa caleesh". Waxaa kale oo la yidhi waa dad dawladda iyo awood sare oo dhan u khuduuca oo qof waliba ciddii uu madax sare u arko is-hoos-dhigo, sidaas owgeed masrigu waa qof xukunka jira u hoggaansan oo ay adag tahay sida uu uga hor-yimaaddaa. Waxaa kale oo Masriga lagu tilmaamay shakhsiyad wejiyo badan gashada oo nifaaq baddan oo marba wejiga uu is-leeyahay way kuugu badinaysaa isu beddela; waa qof sidaa darteed is-burin badan oo waxaa uu hadda ku yidhi berri wax ka duwan ku odhanaya. Waa waxa ay masaaridu yidhaahdaan *fahlawa.* Haddii uu irbad kaa iibinayo, waxa uu ku dedaalayaa in uu sicir aad u sarreeya iyo wax aan carrada ba oollin kaa siiyo, wuxuu na weliba ku odhanayaa oo ku dhaaranayaa in aanu qof kale ka siiyeen intaas ee uu adiga jacayl uu kuu qabo iyo walaaltinimo uu hayyo kaaga siinayo. Bal wuxuu leeyahay waan iska kaa siinyaa oo waa iga hadiyad. Marka ay u mari weydo ee aad isa soo taagto ama aad sicir aad u hooseeya oo asaga khasaare ku ah qabsato(waana sida Masriga kale sameeyo ee aad ka baranayso), markan buu sicirkii dhabta ahaa imanayaa oo aad wax kala iibsanaysaan. Ha-yeeshee weli waxa uu ku leeyahay iska qaado xabiibkay baa tahayee! Markaas ayuun baad dukaankiisa soo gashay, waxaynu u badan tahay in aydaan dibna isu arag, haddana waa kan oo xabiibkiisa ayaad tahay!

Waxaa in badan lagu tilmaamay Masriga qof munaafaqadiisu aad u badan tahay. Xidhiidhka uu suldadda dawladeed la leeyahay wuxuu ku dhisan yahay isla munaafaqadaas. Waxa uu badiyaa ammaanteed iyo mahadinteeda, waxa ay tartay, wax ka jira iyo wax kale ba, haddana marka aad hoos u xog-ogaasho, xidhiidhka labada dhinac waxaa buuxiyey shaki iyo shar-ka-filasho. Had iyo jeer waxa uu ka filanayaa dawladda dhibaato kaga timaadda; ka dib na waxa uu kaga dhuuntaa ammaanteeda iyo u-munaafaqaynteeda. Waxay ku maahmaaheen: 'sharka ka fogow una hees' iyo 'gacanta aad goyn kari weydo waa la dhunkadaa'. Waxaa kale oo derseyaasha Masar qaarkood sheegeen in Masrigu, sida qaalibka ah, uu ku kalsooni roon yahay xidhiidhka shaqsiga ah ee uu la yeelan karo qofka uu tusaale ahaan, qaraabada la yahay ama saaxiibkiis ah ama xidhiidh isku-danaysi ahi ka dhexeeyo ee jago ka hayya dawladda, halkii dawladda iyo hay'adeeda uu kaga kalsoonaan lahaa. Sidaas darteed xidhiidhka qoysnimo ayaa dareenka qofka kaga weyn dawladda. Waayo sida aynu sheegnay dawladda waxaa ka dhexeeya cadaawad, madax-jebin iyo munaafaqad. Masrigu sidaas darteed wuxuu dawladda kula nool yahay oo uu ku la dhaqmaa mowqif iyo si-arag laba weji oo isburinaya leh. Dawladdu noloshiisa, waa lagama-maarmaan oo wuu og yahay in aanu maalin ka noolaan Karin; geesta kale sida aynu sheegnay kalsooniyi kama dhexayso oo waa gacantii uu yidhi: dhunko mar haddii aanad goyn karaynin.

Dhinacyada taban oo qudha lagama eegin ee wax badan oo togan na waa laga sheegay dadka Masar. Waxaa la isku raacsan yahay in dadka Masar yahiin dad dhibaato kasta u dhabar adayga; in ay yihiin dad firfircoon oo saacado aad u badan shaqeeya, ayaga oo aan danqasho muujin; waxaa lagu tilmaamay in ay fahmo badan yihiin oo cilmiga iyo aqoonta kasban ogyihiin ayna heerar aad u sarreeya ka gaadhaan; in ay yihiin dad adduunka debedda u furfuran oo aqoon, cilmi iyo xadaaro ba ka kasba; kuna deeqsi ah gudbinta aqoontooda oo waa dad u jajaban in ay ciiddii u baahan gacan u fidiyaan. Waxaa kale oo lagu tilmaamay in qofka Masrigu yahay qof badiba bulshay ah oo maadeeye ah oo madal ka qoslliya.

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Tajrubo qofeed maxaa marag ah?

Adduunka aynu ku noolnahay iyo waayaha bulsheed iyo degaan ee aad la falgashaa si buu wax kuugu sheegaa, si buu isu kaa tusaa oo aad u qaadataa. Ma run baa mise been? Wax ka run ahi way ku jiraan, wax kale na way jiri karaan; ama dhab ahaan way jiraan. Is-ahaantaada ayaa wax wadata oo is-moodsiiskaaga iyo si-u-qaadashadaada ayaa iyana meeshu soo gelaysa. Masar sidee baan ku la kulmay iyo sidee bay wax ii geshatay?

Garasho ahaan, waxaan adduunka ballaadhan iyo waxa a socda, ku indho-dillaacasaday bilowgii lixdanaadkii qarnigii labaatanaad. Waxaa cirka ku shareerraa dhaqdhaqaaqii xorriyada Afrika; waa sannadkii la magac-baxay sannakii Afrika, sababtoo ah waa sannadkii badanka dalalka Afrika ay madaxbannaanidoodii siyaasadeed qaateen. Waxaan ahaa nin da' yar oo dugsigiisa waxbarasho, si fudud u qaabayn karo maskaxdiisa iyo qalbigiisaba. Macallimiintaydii Machadka Burco ee Diinigu waxay aad ii jeclaysiiyeen Masar iyo Jamaal Cabdinaasir. Dabayaaqadii sannadkii 1963kii, ayaan deeq waxbarsho ku tegay Masar. Marakab lo' qaaday baan ka raacay magaalada Berbera oo dhawr maalmood noo la sii socday dekedda magaalada Suweys. Waxaan markiiba la kulmay waxyaalo si uga duwan waxii macallimiintaydu ii sheegi jireen. Nin sarkaal boolis ah ayaa noogu yimid markabka dushiisa. Naakhuudihii markabka ayuu wada-hadal la galay waraaqo uu sitayna ka buux-buuxiyey; malaha waxa ka mid ahaa dadka aan markab ka shaqayn ee la socda. Anigu mar haddaan ahaa arday u socda Masar, baasboorakayga ayuu fiisadiisa eegay. Waxaa ila mid ahaa arday kale oo asagu masar u dhaafayey Moosko, Xarunta dalkii waagaa la odhan jiray Midowga Sofiyeti. Sarkaalkaasi wuxuu tilmaamo naga siiyey xafiisyada aannu la xidhiidhi doonno ee arrimahayaga fududayn doona. Intaas oo keli ah bay noo ahayd oo wax gaar ah kama baranin ninkaas. Masar oo qayaxan waxaan la kulmay oo ay dareenkayga dhufsatay isla galabtiiba, markii aannu nimi xafiiskii socdaalka(Imigration office). Waxaannu meesha ugu tagnay nin aad u weyn ama runtii isu weyneynaya oo dadka ka hoos shaqaynayaa, si aad ah kor ugu eegayaan; ayaguna, marka ay hor-jogaan, hoos isu dhigayaan. Isla markaa asaga iyo ayagu ba dadkayagan dantu meesha keenatay ayey dusha kaga imanayeen. Waxaa yaab leh magacyada ama laqabyada darajada ah ee tirada badan ee lagaa rabo inaad mid walba ugu yeedho, marka aad adeeg yar uga baahato- *Sacaadatal Mudiir.. Yaa beh ... Yaa ustaad* iyo weliba duco aad u raaciso, sida ugu yaraan *Allaah yakhalliik.* Waxay ahayd wax aan dhegtaydu u baran oo iga yaabinayey. Ta ugu daran ee iga nixisay waxay ahayd markii hawlahayagii dhammaadeen oo aanu rabno inaanu magaalada galno, ayaa mudiirka ama ninkii xafiiska fadhiyey na yidhi meedey xalaawaddii*(feyn alxalaawa)?* Waar waa maxay xalaawadda la ina weydiinayaa? baan idhi. Nimanka xarraasiinta ka ahaa lo'da uu markabku siday oo marar hore meesha yimid, ayaan garo oo, su'aasha weydiinayaa. Waxay yidhaahdeen waa dhaqan meesha yaalla; waana googo' lacageed ama hadiyad wax noqon kara. Ma laaluush baa? Waxay yidhaadeen maya; waayo ma aha wax ku xidhan shaqadii la inoo qabtay(illayn waaba na loo qabtaye) ee waa dhaqan la isla oggol yahay; wax la la yaabo masaarida aktooda ka ma aha.

Intii ka dambaysay maalintaas, muddo ku dhow toddobo sannadood, wax badan baan ka arkay ifafaalayaashaas. Araday baan muddodaas oo dhan ka ahaa masar; aradayda aan wax la baranayey, heerkii dugsiga sare iyo heerkii jaamacaddaba waxaan la kumay oo aan ka bartay arday aad u fahmo badan iyo kuwa fahmo daran oo inta badan ka yimid qoysas aad u sabool ah oo aad arkayso in ay bah-dilan yihiin. Giddiba ama badi waxay uga sinnaayeen *qishka* imtixaanka(khiyaamada). Waxay belo ku qabeen qoraallo far yar-yar oo la soo qarsado iyo kala eegasho waxa uu midkoodba qorayo. Waxaan la yaabay ardaygan, maskax iyo hawlkarnimoba, aad u heerka sarreeya, ee is-huba in uu itixaanka si wacan uga baxayo, ee haddana si walba isugu deyaya in uu waddo qalloocan ku fowso. Haddii aad weydiiso waxa ku kellifaya khiyaamada intixaanka, mar haddii uu is-hubo in uu ku guulaysanyo, jawaabtiisu waxa weeye: haddii ay ii maraayso waa iska *'maa caleesh'*! Naadirka(maamulaha) dugsiga iyo macallinku waa suldad ama waxa u dhigma awoodda dawldeed ee dugsiga ka jirta; marka uu ardayda horjoogo si xad-dhaaf ah, oo nifaaq badani

Copyright © 2011 WardheerNews.com

ku jiro, baa loo ixtiraamayaa oo magacyo derejo weyneyn ah loo maqashiinayaa; marka uu sii jeesto ayaa isha, carrabka iyo gacmahaba, si farsamo ah xumo loogu sagootiyeyaa.

Waxaanu si joogta ah u la macaamil-lahayn Hay'ad gaar u qaabbilsan maamulka arrimaha ardayda dalalka debedda ka timaadda. Waxay ahayd meesha laga bixiyo deeqda waxbarasho; joogitaanka ardayga ee dalka na laga agaasimo. Marka arrimaha ardaygu dhinac walba ka toosaan ee ay arrimihiisu caadi yahiin, ugu yaraan sannadkii hal mar buu u baahan jiray in uu la xidhiidho hay'addaas. Waxaa mar walba khasab ahayd in uu ardaygu soo qorto warqad codsi ah oo ku saabsan waxa uu rabo in loo qabto; uuna ku soo dhejiyo tigidh qiimihiisu qurush yar ahaa. Marka uu xafiiska ay arrintiisu khusayso yimaado, waa in uu soo gala asaga oo hoganaya oo uu saacado sugaa in la qaabbilo. Marka uu la kulmo masuulkii wax u qaban lahaa, waa in uu hoos isu dhigaa oo kor ninka ama haweeneyda u eegaa oo uu magacyo ka horreeya magaciisa ama magaceeda dhabta ah ugu yeedhaa. Waxaas oo dhammi waa Dawladdii qalladda ahayd ee awoodda badnayd oo mar ba si isu muujinaysa. Waxay ugu daran tahay marka uu arrin culus wato ee go'aanka looga baahdo madax sare, sida Agaasimaha sare ama Wakiilka Wasaaradda ama ilaa Wasiirka. Haddii ay dhacdo in uu ardaygu arko ninkaas sarreeyaha ah, waxay qaadanaysaa waqti aad u dheer; waxaanuu u imanayaa nin hortiisa labada suul lagu soconayo oo laga dhawrayo sanqadha cagta dhulka la dhigayo.

WAxaa kale oo isku maraya oo ay adag tahay sida uu lugaha uga la baxaa, shabakad la yidhaahdo xeer-nidaamiyeyaal oo ay ka mid yihiin kuwo qarni ka hor la soo saaray; heyeeshee aan marna ba lagu fekerin in la beddelo, si kasta oo xaaladdii loogu talo galay ay meesh uga baxday; uuna xeerkaasi u noqaday wax aan sinaba loogu baahanayn. Xeerarkaasi mararka qaar bay noqdaan wax Reeba sheeko lagu maadsado oo dadka ka qoslisa. Waagaas aan Qaahira ku sugnaa, waxaan xusuustaa sheeko lagu qoray mid ka mid ah wargeysyada dalka. Waxay ku saabsanayd gunnada baqasha Sheykhal-Azharaka. Sheekadu waxaa weeye berigii aanay dunida buubuuri jirin, waqti malaha, ku siman qarnigii sagaal iyo tobnaad, ayaa sharci soo baxay siinaya Sheekhal-Azharka lacag gunno ah oo ku magacaaban calafka baqasha uu sheekhu fuulo ku na shaqo tago. Lixdannadii qarnigii labaatanaad ayaa nin dhallinyaro ah oo shaqada ku cusubi, markii la hor keenay musharka Sheekha, la yaabay gunnadan ku magaca leh baqasha Sheekhal Azharka, ka dibna wuu jaray. Sheekhii baa Telefoon qaylo-dhaan ah soo diray oo yidhi lacagtaydii ma dhamma ee maxaa jira? Sheekaddu waxay tidhi sheekhii wuxuu ku yimid xafiiskii Maaliyadda baabuur *Mercedes* ah. Waxay ku tusaysaa dawladda Masar, ka sokow qalladda ay tahay, gun adaygeeda ama sida uu is-beddelkeedu u adag yahay.

Waxaa la yidhaa dadka Masar waxay leeyihiin dhaqan deeqsinimo. Wax badan ka run ah. Haddii ay, tusaale ahaan jidka tabaale kugu qabsato, sida baabuurka oo cilladi kaa gasho ma waayeysid dad badan oo kuugu soo leexda si ay gacan kuu siiyaan. Agtaada qof Masri ahi, ma dhacdo in uu wax ku cuno asaga oo aan kugu marti-qaadin oo aan ku odhan *faddal*. Kooda u saboolsan ee ceesh qaraxa biyo ku kabbanaya, haddii aad soo ag-marto wuu kugu soo dhawaynayaa oo waxuu ku odhanayaa *faddal*. Marar badan Masaarida waa lagaga maadsadaa taas; waxaa la yidhaa faddalta uu ku leeyahay waa afka keli ah ee haddii aad ka rumaysato oo aad la cunto, wuxuu mar dhow kugu xamanayaa in aad tahay qof aan dooq iyo damaq toona lahayn. Macnuhu waxa weeye marka uu ku yidhaahdo *faddal* wuxuu kaa filayaa in aad dhahdo *shukran*(Mahadsanid), aanadse rumaysan oo aanad gacanta la gelin cuntadiisa. Xanta meesha lagu dahayaa waa munaafaqadii Masriga lagu sheegayey; Ma wada aha sidaas, ee runtii dhaqanka deeqsinimada masaarida wax baa ka jira.

Wax kasta oo la Yidhi Maxaa Maanta ka Jira?

Maanta waxaa jira xaalad aan looga baran lagana filaynin dadka Masar. Waxa lagu yaqaanay dad wax kasta oo ku yimaadda iska oggolaada oo aan xaakinkooda ka hor iman; caddaald-darro

Copyright © 2011 WardheerNews.com

weligood ba ku noolaa oo u gaadiiday. Xaakin dadku iska ridaan iyo mid ayaga rabitaankooda ku yimaadda waxay taariikhdu xustay bilowgii qarnigii sagaal iyo tobnaad tii uu Maxamed Cali Baashaa ku qabsaday xukunka Masar. Waxa uu ahaa taliye ka tirasan ciidammadii Ebiradooruyadii Cusmaaniyiinta Turkiga. Dhammaadkii qarnigii siddeed iyo tobnaad, sannado yar markii ciidnakii Nabilyon ee Faransiisku ay Masar haysteen ayey ka baxeen. Waxaa halkaas ka abbuurmay xaalad ay awooddii Mamaaliiktu tamar-gabtay oo dalku khal-khal galay, uuna dawlad la'aan ku sigan yahay.

Maxamed Cali Baashaa wuxuu ahaa nin geesi ah oo hankiisu weyn yahay. Wuxuu ka dhashay dadka Reer Albaniya. Waxa uu taliye sare u ahaa cutubka Reer Albaniya oo ka tirsanaa ciidammada Embradooriyadda Cusmaaniyiintu u dirtay Masar, ka dib ka-bixiddii ciidanka Nabilyoon. Ciidammadan Turkigu waxay markan Masar key soo noqdeen ayadoo dalku qasan yahay oo xukunkii Mamluukiguna daciifay awooddii Faransiisna ka tagtay. Maxamed Cali xaaladdan buu si xarfad leh uga faa'iidaystay oo hirdankii ciidammda Turkiga iyo Mamaaliikta ayuu ciidankiisa ka ilaashay; isla markaana isku dhaca labada geesood buu ka dhex faa'iidaystay; dadweynaha Masarna sumcad buu ka korodhsaday. Waxay aakhirkii u dhashay in 1801dii, culamadii Al-azhar oo dadweynihii horkacayaa ay u yimaaddaan Maxamed Cali Baashaa oo ka dalbaan in uu asagu qabsado jagada Waaliga Masar, la na rido Waaligii dawladda boqortooyada Turkiga ugu magacownaa dalka, Axmed Khoorashiid. Maxamed Cail Baashaa waxa uu ahaa, qarniyo badan, ninkii u horreeyey ee ay dadka Masar lug ku yeeshaan imaatinkiisa xukunka; waana xaakinkii, markii u horreysey Masar u horseeday xagga horumarka cilmiga iyo farsamada casriga ah ee waagaa ka hana-qaaday Yurub. Waxaa se uu ku beegmay xilligii gumaysigii dawladahaas Yurub uu duullimaadka ku ahaa dalaka Afrika iyo Aasiya waa na laga la dagaallamay in uu himiladiisa gaadho.

Waxaa jirtay maalmo kale oo ay dadka Masar tu la yaab leh dhigeen. Sannadahii aan Masar ka ahaa ardayga, waxaa aad u kacsanaa xiisaha dhaadashada carabnimada oo uu hoggaaminayey Madaxweynihii, Alle ha u naxariisree, Jamaal Cabdinaasir. Baaqa codka dheer ee dhaadashaasi waxa uu in badan ka aloosnaa warfaafinta dalka. Dugsiyada na waxaa lagu baran jirey taariikhda halgankii dadyowga carbeed; waxaan mudnaan door ah la siin jiray kacdoonkii Masar ka bilaamay 1919kii. Waxa uu ahaa kacdoon dadweyne oo ay ka qayb-galeen dhammaan qaybaha dadka Masar, miyyi iyo magaalo, muslin iyo masiixi ba, ganacsato iyo shaqaale, arday, macallimiin, iyo ilaa haween intaba. Waxa uu na ahaa dhaqdhqaaq lahaa bannaabaxyo iyo kulanno ballaadhan oo dadweyne. Waxaa lagaga hor-jeeday xooggii gumaysiga Ingriis ee si dadban u haysatay Masar iyo Suudaan. Waxay ka bilaabatay ka dib markii uu dhammaaday dagaalkii koowaad ee adduunku, ay waddaniyiintii masaarida oo uu hoggaaminayo Sacad Zagluul ay isu qalaqaaliyeen in ay wafti ugu baxaan Baaris, xarunta dalka farnsiiska, si uu uga qayb-galo shirka nabadda ee halkaasi lagu qaban doono..... Si taasi ugu suurowdo ayey Ergeygii sare(high Commissioner) ee Ingriiska u qaabilsanaa xukunka *ximaayada* Masar(Protectrate power) ka codsadeen in la soo af-jaro gacan-ku-haynta xukunkaas asaga ah ee Masar iyo Suudaan, loona oggolaado in ay madaxbannaani kaga qayb-galaan shirka Baariis. Waa laga diiday. Kacdoonkaasi wuxuu ku guulaystay in ay Masar sannadkii 1922kii Madaxbanaani siyaasadeed ka qaadato Ingriiska, in kasta oo ay Suudaan ku hadhay gacantii gumaysiga, Ciidammadii Ingriiskuna aanay ka kacin Suweys Kanal.

Waxaa xusid gaar ah inaga mudani waa hoggaanka uu kacdookani soo if-bixyey. Sacad Zagluul iyo xisbigii la baxay magaca Alwafdi waxay taariikhda dalka Masar ka galeen meel weyn; ilaa tan iy maantana waa wax si nool ugu jira xusuusta wadareed ee dadka Masaarida. Isla markaas, sidii dhaqanka Masaarida lagu yaqaannay Sacad Zaqluul, sida loo weyneynayaa waa fircoon kale oo aan magacii fircoon wadan; dhaqanka Masarna raad bay ku raabtay. In kasta oo kacaankii Jamaal Cabdnaasir ee 1952kii uu xisbiyadii siyaasadeed titiray, xisbigii Sacad Zagluul xusuusta dadka ka ma bixin; maantadanna wuu jiraa.

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Maalmo kale oo aan goob-joog u ahaa, baa iyana jiray. Waa laba maalmood oo la yaab aad ah lahaa. Jamaal Cabdi-Naasir waxa uu ahaa ninkii hoggaaminayey ooggii qoomiyadda carabeed, baaqii codka dheeraa ee xornimada iyo midnimada carbeed iyo hantiwadaagga carbeed ee sida laxaadka lehna uga soo hor-jeeday fikirka iyo siyaasadaha gumaysigii Reer galbeedka. Dagaalkii 1967kii, ayaa si xun Israa'iil ugu jebisay ciidammadii Masar, Suuriya iyo Urdun. Waxay Israa'iil afar maalmood gudahood ku qabsatay dhammaan saxaraha Siinaa oo dhulkii Masar ah; buuralayda Golaan oo suuriya lahayd; Qaza iyo Daanta Galbeed ee Webiga Urdun iyo Bariga magaalda Quddus. Afar maalmood ayey wasaaradda gaashaadhigga Masar si is-daba jood ah u soo saaraysay war-cadaymo rasmi ah oo ka warramaya "guulaha ciidammada Masar ee geesiyaasha ahi ka soo hooyeen ciidammada cadowga, hubka ay ka burburiyeen iyo ka ay ka furteen". Idaacadaha iyo telefisoonnada dawlada waxaa si aan kala go' lahayn uga socday heeso dagaal ah oo dhego-barjo ah.

Maalintii bisha juun ahayd sagaalka ayaan barqadii hore ka soo baxay gurigii aan degganaa oo ku yaallay xaafadda A-daahir(Daahir Beberis); ilaa badhtamaha magaalada ayaan lug ku soo maray. Waxaa dareenkayga soo jiitay hal-ku-dhegyadii dhiirrigelinta dagaalka ahaa iyo sawirradii geesiga carbeed(Jamaal Cabdi Naasir) ee jidadka iyo suuqyada buuxiyey oo laga guray. Isla markaas, firxadkii ciidammada dagaalka ku soo jabay ayaa qaarkood magaalada soo gaadheen oo si xam-xam ah maalintaaba lagu maqalayey. Wargeyskii u horreeyey ee aan la kulmay ayaan iibsaday. Waxaa ku qornaa in Madaxweyne Jamaal Cabdi Naasir, toddobada saac ee galabta, uu khudbad u jeedin doono ummadda. Waxaa igu soo dhacday in aanay khudbaddiisa galbatu tu libineed ahayn. Waxaan is-idhi tallow miyaa la qabtay oo waxa soo socdaa waa khubad khasab ah, mise asagaa ba xil-ka-degid la imanaya. Waxa aan male-awaalay in galaabtaas wax weyni dhacayaan; sidaas owgeed baan casarkii maalintaas u soo dhal-dhoolay naadigii ardayda Soomaalida. Wax yar ka dibba, saacaddii waxay garaacday toddobadii galabnimo. Waxaa ka soo baxay Tviga nin ka duwan Cabdi Naasirkii dhabarka toosnaa ee muuqa fir-fircoon lahaa ee aannu sawirkiisa ka daawan jirnay shaashada la iska arko ama aanu sawirkiisa ku arki jirnay wargeysyada. Waxaa ka soo baxay telefeshanka Cabdi Naasir isku dumay oo ay guuldarradu wejigiisa ka muuqato. Waxa uu halkii ka jeediyey khudbad gaaban oo uu inta hore kaga warramay wax dhacay. Meesha aan u dan-leeyahayse waa ta uu ku gebogebeeyey. Waxa uu yidhi: 'Waxa aan qaatay go'aan aan rabo in aad igu gacan-siisaan. Waxaan go'aansaday in aan jagada madaxtinnomo ka dego, farahana ka qaado jago kasta oo rasmi ah iyo kaalin siyaasadeed oo walba; kuna laabto ku-dhex-noolaanshaha dadweynaha; aanna gudto waajibkayga aniga oo la mid ah muwaadin wal oo caadi ah...'.

Ereygii u dambeeyey ee khudbaddiisa waxaa xigay lama-filaan. Sallaanka ayaan hoos uga soo daadegey, debedda ayaan uga soo baxay daartii weyneyd ee uu ku yaallay Naadiga Ardayda Soomaalidu; mise waxaa baariga igu qaadan gaadhay mowjado dad ah oo baabuurta, taxi iyo basasba boobaya. Dayaanka qaylada dheer ee *Naasir Naasir Naasir* ayaa magaaladii Qaahira ka gariirinaya. Malaayiin rag iyo dumar, dhallinyaro iyo waayeel ba ah, ayaa u qulqulaya dhinaca guriga Madaxtooyada ee Qasru-Qubba, Misraljadiida. Waxaa cajiib iyo wax aan la ilaabin Karin ahaa shucuurta dadka ka muuqatay, naxdinta iyo anfariirka uu ku riday go'aanka Madaxweynahu; *Laa yaa Jamaal iyo Naasir Naasir*!. Kuwo badani ayaga oo ooyaa ayey sidaas lahaayeen. Naftu may xejinayanin wixii aanu maalintaas iyo maalintii xigtay aragnay. Gaar ahaan marka aad aragto niman waaweyn oo ilmaynaya isma hayn kartid oo waad ku daraysaa. Habeenkii Qaahiri waxay ku bariday guriga Madaxtooyada debeddiisa, maalintii labaadna barqadiiba waxaa magaalada isku soo shubay dadkii ku noolaa magaalooyinka iyo gobollada dalka intiisa kale. Dhammaan ba barxadaha iyo jidadka Qaahira waxay il-yartu is-qabatay dadweyne magac Naasir ku qaylinaya oo leh: joog oo jagada hay. Wuxuu Jamaal Cabdi-Naasir ahaa hoggaamiye dagaal ku jabay oo sababay in qayb ballaadhan dalkiisa cadow qabsado; Siinaa oo dhan baa la haystay oo Suweys Kanaal bay ciidammada Israa'iil dhinaca kale ka soo fadhiisteen. Haddana dadkiisu waxa u muujiyeen jacayl aan xad lahayn, waxayna ka diideen in uu jagadda ka dego.

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Wargeysyadii maalintaas ka soo baxay Qaahira waxaa ku qornaa maqaalado badiba koob-kooban oo Madaxweyne Jamaal Cabdi-Naasir ugu baaqaya in uu ka noqdo is-casilidda. Ha-yeeshee kuwooda xukunka u munaafaqyn jiray xiise ma lahayn; waxaa si weyn ii taabtay maalintaas qoreyaashii xukunkii Cabdi-Naasir runta u sheegi jiray ee mararna dhibaatooyinka ku mutaystay. Ereygoodu maalintaas wuxuu ahaa erey ragannimo. Waxaa kuwaas ka mid ahaa Khaalid Maxamed Khaalid. Khaalid Maxamed Khaalid, Alle naxariistiisa ha ka wraabiyo, Maqaal aad u gaaban buu maalintaas ku qoray wergeyska Aljumhuuriya. Maqaalkaasi wuxuu ahaa cashar aanan illaawin. Cabdi-Naasir buu hadalka u jeedinayey oo hal-ku-dheggiisuba waxa uu ahaa: ***Laa yaa Ra'iis***(Maya Madaxweyne). Maqaalku wuxuu si fudud u hogatusaaleynayey farqiga u dhexeeya in goob dagaal oo mar ah lagu jabo iyo in guud ahaan ba, dagaalka ama xarbada laga la kulmo guuldarro kama dambays ah. Wuxuu tusaale u soo qaatay dagaalkii labaad ee dunida, gaar ahaan farantii Ruushka ama Midowgii Soofeti iyo Jarmalkii Hitler. Waxa uu tilmaamay in jabkii ku dhacay Midowgii Soofiyeti uu gaadhay in ciidammadii Jarmalku ay soo fadhiistaan Mosko kambalkeeda. Waxay ahayd, buu yidhi, hal dagaal oo Midowgii Soofiyeti si xun loogu jabiyey; ha-yeeshee ma ay aqbalin is-mana dhiibin ee waxay ku tashadeen u na salab-qaateen in ay dagaallamaan ilaa guusha kama dambaysta ah. Sidaas darteed, buu yidhi, jabkii dhabta ahaa ee dagaalkii labaad, wuxuu raacay Hitler iyo ciidammadiisii. Waxa ay murtida maqaalkaasi ahayd Masar hal dagaal iyo goob hal mar ah ayey maanta ku jabtay, dagaalkiise ku ma dhammaanin ee Jamaalow, hoggaami dalka iyo dagaalkaba ilaa guusha kama dambaysta ah.

Waa la hubaa oo maalintaas Israa'iil iyo dawladaha Reer Galbeed oo nacayb badan u lahaa Jamaal Cabdi-Naasir, ma filaynin ma na ay rabin in ay siyaasadda caalamka carbta Cabdi-Naasir dambe ku arki doonaan, ha-yeeshee dadweynihii Masar ayaa maalinta la yimid tu kale. Ereyga Khaalid Maxamed Khaalid(Alle ha u naxariisto) waa mid ay Masar iyo Jamaalba u baahnaayeen maalintaas.

Dhinaca dadka Masaarida ah, waxaa si uga muuqan karta oo lagu timaami karaa dhaqankii xididdada adkaa ee madax-caabudka iyo samaynta fircoonnada. Ha yeeshee, sida aan rumaysanahay, wax kasta oo ay ahayd guul-darrada dhacday, dadka Masar waxaa ka sii fajiciyey xaaladda hoggaan-la'aaneed ee daba socota is-casilaadda Cabdi-Naasir. Dadka Masar waxay weligood ahaayeen dad xaakinkooda dugsada oo isku halleeya, gaar ahaan marka ay bilaayo timaaddo, si kasta oo ugu daran yahayna u dul-qaata. Xigsintii ay Masar hoggaan la'aan dareentay ayuu argaggax ku dhacay oo ay oogsatay. Waqtigu na gaar buu ahaa oo halis baa taagnayd. Isla markaa Jamaal Cabdi-Naasir ma ahayn nin ay dani ku qabatay ee lagama-maarmaan buu ahaa; kolsooni baa lagu qabay, jacayl na waa loo hayey.

Waxaa dareen-jiidasho leh kacdoonkii 25kii janweri, 20011, sida uu u jebiyay dhaqankii ahaa aqbal-keenka indho-la'aaneed iyo madaxda oo loo foororsado. Waxa uu kacdoonkaasi ina tusay Masar weji kale leh. Waxaa laga yaabaa in Xusni Mubaarak uu yahay *Fircoonkii*(haddii aynu is-fircoonaynta Fircoon nidhaahno) u horreeyey ee dadweynahu kursiga khasab kaga dejiyo. Qarnigii sagaal iyo tobnaad, markii ay culamada Azhar oo dadweynaha hor-kacayaa ay Khoorashiid jagada waaliga ka dejiyeen ee ay saareen Maxamed Cali Baashaa, wax ka ma ay beddelin dhaqankaas asaga ah. Kacdoonkani fircoon oo dhan buu ka hor yimid. Malaayiintii bisha dhan banaabaxasay ee ciidammadii cadaadisdka iyo madax-jebinta talisku loodin waayeen, waxay diiddanaayeen keli-talis iyo keli-taliye dhammaantii. Waxaynu odhan karnaa nuxurka dimoqraaddiga ah ee kacdookani wuxuu soo af-jaray taariikhdii xaakinka dhaqanka fircoonnimada ah lahaa ee ay Masar qarniyada badan ku soo jirtay. Malaayiin baa soo debed-baxay oo jidadka socod ku maray oo buux-dhaafiyey barxadaha magaalooyinka ay ka mid yihiin Qaahira, Iskaderiya A-suweys iyo kuwo kale. Waxaa weheliyey shaqo-joojin iyo dadka rayidka ah oo suldada dawladda ku caasiyooba. In kasta oo uu ahaa dhaqdhaqaaq nabad-gelyo u socda, haddana ciidammada amniga ee xukunku waxay adeegsadeen

Copyright © 2011 WardheerNews.com

cunfi badan oo dhimadsho iyo dhaawacba keenay. Waxaa ka dhashay gadoodka(riots) oo mar walba taas kaga sii dara iyo dadka oo mowqifkooda ku sii adkaysta.

Waxaa kacdoonka isna la xidhiidhay ifafaale kale oo asaguna ina tusay Masar tii hore ka geddisan. Waxa uu ahaa Qaddiyadda dadweynaha kacdoosan oo ahayd mid ku arooraysay is-bedel taariikhi ah. Cabshadu waxay ahayd tu weji siyaasadeed leh oo la xidhiidha falalka cunfiga iyo dibindaabyada ciidammada amniga iyo booliska; qaanuunka xukunka degdegga ah ee dalka lagu xukumayo, intii taliska Xusni Mubaarak jirayba; maqnaanshaha doorasho xor ah iyo xorriyadda hadalka; musuq-maasaaqa maamulka dawladda ee aan xadka lahayn. Cabashooyinka dhinac dhaqaalaha na waxaa ka mid ahaa shaqo la'aan, sicir-barar si weyn u saameeyey lagama-maarmaanka cuntadu u horrayso iyo qiimaha shaqada oo aad u hooseeya. Intaas oo dhan midda ay jid uga dhigteen ee dhawaqa dadku ku midaysnaa waxay ahayd Xusni Mubaarak iyo kooxdiisa oo dhakhso xukunka uga dega. Intaas oo dhammi waxay muujinayaan in wacyiga dadku ka gudbay xalka dhibaatooyin oo laga raadiyo xaakin la rido oo mid kale lagu beddelo- fircoon cusub oo la keeno meeshii kii hore ka kacay. Waxaa la wada lulayey afkana lagaga qaylinayey: *irxal... irxal... irxa*l iyo *wuxuu shacabku rabaa in taliska la rido*. Mar qudh ah lama maqal nin la leeyahay xukunka ha qabto. Beddelkeeda waxaa la dalbaayey dastoorka oo la beddelo iyo doorashooyin xor ah oo xalaal ah iyo talada oo uu dadweynuhu wax ku yeesho. Waa Masar tii hore si weyn uga duwan.

Sabirkii nabi Ayuub ee lagu sifayn jiray dadka Masar, haddii uu ahaa dhibta oo loo adkaysto, maanta waxa uu u egyahay mid meesha ka baxay; Masar waxay muujisay sabir togan oo kii hore ka duwan; waxayna la timid, baynu odhan karnaa, **sabir sabir la'aaneed**. Laga soo bilaabo 25kii Jannaayo ilaa 11 Febraayo, ayey barxadda Taxriir ee badhtamaha Qaahira, habeen iyo maalin ba buux-dhaafiyeen dad aan tiro lagu koobi karini; sidoo kale ayey ahaayeen badanka maagaalooyinka kale ee dalku. Waxaa dadkaas si joogto ugu dhacayey weerarka ciidammada amniga oo ku caan-baxay ciqaabta dadka qofkii gacantooda soo gala; ciidan marka la magac-dhabo la kala didi jiray. Dhimasho iyo dhawaac iyo kuwo la qabtay oo la la tegay meel aan markii la garaynin, wax badan baa ka dhacay. Maalin kasta oo Jimce ahi waxay noqotay ballan ay malaayiini ku kulanto salaadda jumahcada. Shaqo oo dhan baa joogsatay, ganacsigii caadiga ahaa baa is-taagay. Halkii awel laga quusin jiray dadweynihii Masar, asagaa xaakinkii quusiyey. Sida uu dadku halgankan ugu dhabar adaygay wuxuu ahaa mowqif cusub oo ku dhisan sabir nuxurkiisa yahay in aanay xukukii Xusni Mubaarak dib ugu dul-qaadan; wuxuu ahaa sabir sabir la'aaneed. Is-beddel weyn baa meesha ka muuqda. Waxaan ka wadaa is-beddelkaasi ma aha in Masar ay ka tagtay sabirkii, balse waa sabirkii oo ay si togan u adeegsatay oo hub uga dhigatay ridid da taliska. Haddii ay Masar awel dhibta ku sabri jirtay hadda halganka ayey ku sabirtay.

Daktoor Axmed Zaayid oo ah caalin bulsheed Masri ah, muxaadaro uu ka jeediyey *kulankii labaatanaad ee Wadaagayaasha horumaraka(3 Mayo, 2009),* kuna saabsanayd mowduuca astaamahii lagu yaqaannay shaqsiyadda bulsheed ee Masaarida, wuxuu xusayaa in markeeda hore ba sifada sabir badnida Masaaridu ay leedahay xad aanay dhaafi Karin, taas oo uu ku magacaabayo karkaarka sabirka(catabadda). Waxa uu ku tilmaamayaa heerka uu dadku dareemo halis dhab ah oo kama dambays ah, markaas oo cadhadu karkaarka jebinayso uu na dhacayo qarax dadweyne. Waxa uu tusaale u soo qaatay gadoodkii ku saabsanaa kordhinta sicirka ceeshka waagii uu Anwar A-Saadaat Masar ka ahaa madaxweynaha*(Dr Axmed Zaayid, Simaatu Ashakhsiyah Al-Masriya beyna Athabaat wa Ataqayur, htt:/www.pidegypt.org, 3 Mayo, 2009)*. Waxaa ka muuqday dadka bannaan-baxayey cadho karaar dhaaftay, kalsooni-bax aanay rumaysnaynin Wax kasta oo uu Xusni Mubaark iyo wasiirradiisu ay sheegaan ama ay ballanno qaadaan. Ciidammada madax-jebinta ee uu taliska Xusni Mubaarak adeegsanayey dhagar badan bay dadka ka galeen, waxayna geysteen dhibaatoyin dhaafay xadkii dul-qaadashada dadka. Cadhada dadka ka muuqatay ayaa taas tilmaamaysay. Waxaa xusuustayda ku soo noq-noqonaysa islaan da' ahayd oo qiyaastii malaha toddobaantan iyo ka weyn ahayd, ayna dhibaatada saboolnimadu korkeeda ka muuqatay; marar badan bay ka soo baxaysay

Copyright © 2011 WardheerNews.com

shaashada Aljaziira; waxay sidatay warqad woxoogaa ballaadhan oo u eg kartoonnada alaabada lagu keeno; waxaa far aan aad u muuqan oo qalqaloocan ugu qarnaa oo ay is-hor haysay: *"Irxal yaa khanziir"*. Islaantaas inta ay soo dhaqaaqday, halkaas la timid ereyadaas ba'an ee ay gacanteed ku soo qoratay, cadhadeedu waxay u badan tahay mid qof ahaaneed. Wax u gaar ah oo ku dhacay baa meesha keenay oo taas ka keenay. Talow ma ku ay dhashay baa talisku xaq-darradiisa badatay ku xidhay oo xabsiga lagu dilay ama ka soo baxay asaga oo curyaan ah ama indho la' ama si kale ba u naafo ah? Waa xaalad laga la soo baxo oo ka dhacada badiba xabsiyada caddibaadda.

Xaqiiqo iyo Cashar

Sida aynu hore u tilmaamnay siyaasadahii reer galbeedku ku la dhaqmayeen adduunka carabta waxay ku dhisnayd in aan keli-taliska carbeed isku beddeleynin wax aan ahayn afgembi millateri ama duullaan debedeed. Haddii taariikhda la daliishanayo, Masar wax badan bay taas ka marag-kacaysaa. Fikraddaasi waxay ahayd ta ay Israa'iil in badan cuskato oo ay saaxiibbadeedna ku al showrto ee ay rumaysiiso. Sidaa darteed mushakiladda Maraykan iyo reer galbeed ee u weyni waxay ahayd sidii keli-taliye danahoodu u jajaban oo aan taladooda ka hor-iman ay u heli lahaayeen, Xusni Mubaarak, Zaynu-Caabidiin Binu Cali iyo duubabka Sucuudiga iyo Khaliijka oo kale. Waxay xujadu ahayd Adduunka Carabta cid kale oo xidhiidh wax-ku-ool ah la la yeeshaa ma jiraan. Kacdoonkani taas ayuu si wacan u beeneeyey, wuxuu na soo ban-dhigay quwadda is-beddelka ee ka iman karta dadweynaha. Xaqiiqadaas Maraykan iyo Yurub, dani-ku-te ba ha noqotee, way aqbaleen, israa,iilse aad bay ilaa hadda uga maagaysaa rumaysigeeda. Runtii wax badan oo ay Israa'iil isku hallayn jirtay baa dumay; haddii aynu wax kaleba dhaafno Xusni Mubaarak kaalin muhiim buu ugu jiray(shidaalkii ay sicirka rakhiiska ah ku qaadanaysay ayaa in badan suurageliyey duqayntii Qaza ee sannadkii 2009kii). Sida maanta laga wad warqabo, cunaqabataynta Israa'il ay sannadaha ku hayso Qaza, Xusni Mubaarak qayb buu ka ahaa oo siyaasadda Israa'iil si ficil ah buu qaybtiisa u fulinayey markii uu xidhay marinkii keli ahaa ee Qazi adduunka ku la xidhiidhi lahayd. Markii la riday ayey Masar furtay irridda Rafax ee xudduudda Masar iyo Qaza.

Xaqiiqo kale oo is-weydiin mudani waxa weeye: ma dhab baa Masar waa lafta dhabarka ee adduunka carabta? Haddii aynu ka bad-badinta Masaarida dhinac iska dhigno, Masar waa dalka adduunka carabta xagga tirada dadka ugu badan, waxaana lagu qiyaasi karaa ilaa kala badh dadka ku nool dalalka carabta dhammaantood; waa dalka xagga xoogga millateri ugu quwadda weyn; waana dalka aqoon cilmiyeed iyo dhaqan il-baxnimo ugu hore marsan. Waxaad ku dartaa joqoraafi ahaan halka uu dalka masar adduunka kaga dhaco oo ah meesha u muhiimsan ee isku xidha bari iyo galbeed, taas oo ahamiyaddeedu aad kor ugu sii kacday ka dib 1869kii, markii la hir-geliyey kanaalka suweys ee xidhiidhiyey badda cad iyo badda cas. Wacaalyaashaasi ayey ku fadhidaa saamaynta iyo nufuudda dheeraadka ah ee Masar loo tiriyo in ay ku leedahay caalamka Carabta. Jamaal Cabdiraasir hiyi-kacii qoomiyadda iyo midnimadda carbeed ee uu hoggaaminayey, kontonnadii iyo lixdannadii qarnigii labaatanaad, waxay ruxeen dalalka carabta dhamaantood. Xarakadii towraddii 1952kii ee ay ciidammada hubka sidaa ku af-gembiyeen boqor Faaruuq, uuna hoggaaminayey Jamaal CabdiNaasir, waxay noqotay ku-dayosho ku fidday dalalka carabta, waxay na horseedday af-gembiyo badan oo ka dhaca dalal badan oo carbeed, kuwo guulaystay iyo kuwo dhicisoobay ba.

Casharro muhiim ah baa ku jira oo laga korodhsanayaa waxa beryahan ka dhacayey Masar iyo adduunka carabta. Waxaa ka mid culayska dhibaatooyinka uu xukunka diktaatooriga ahi ku reebo dalka uu qabsado. Waxaa u horreeya sida uu bulshada uga dilo kartida xallinta mashaakilkeeda iyo hirgelinta is-beddel run oo midho dhala. Dhibaatada keli-talintu ma aha oo qudh ah awoodda go'aanka siyaasadeed ee ku ururaysa gacanta keli-taliyaha. Waxaa ka sii daran, waxay tirtirtaa dhammaaba hab-dhismeedyada(institutions) siyaasadeed iyo bulsheed ee madaxa bannaan ee ay bulshadu leedahay. Sidaad darteed waxa meesha ka baxa oo wax aan jirin noqda heerarka is-

Copyright © 2011 WardheerNews.com

hoggaaminta kala duwan ee uu dhaq-dhaqaaqa bulsho-siyaasadeed u baahan yahay. Marka aynu hadda u fiirsanno Masar, way ka jireen magacyo xisbiyo siyaasadeed iyo ururro madani ahi; hayeeshee cadaadinta iyo cabbudhinta talo-maroorsiga Xusni Mubaark waxay ka dhigtay wax magac ahaan mooyi ee aan dadka xidhiidh togan iyo saamayn wax-ku-ool ah ku lahayn. Xisbiga Dawladdu(Xisbigii Xusni Mubaarak ee Alxisbu-lwaddani) waxa uu ahaa xero ay isugu yimaaddaan inta keli-taliyaha u durbaan-tunta ee waxa uu hadba rabo baahisaa; waxaana kale uu ahaa isutag aan sina uga jawaabin dareenka dadweynaha, kana tibaax-keenin danaha bulshada; waayo xidhiidh noocaas ahba la ma lahayn dadka. Wuxuu xidhiidh lahaa keli-taliyaha iyo ciidammada amniga. Sidaad darteed waxaa lagu sheegi karaa aalad uu lahaa taliska diktaariga ahi.

Xisbiyada kale badankooda waxa uu talisku ku la dhaqmayey siyaasad ah in ay magac ahaan jiraan, aanayse ka soo ag-dhawaan meel ay go,aanka talada ka saamayn karaan. Doorashada heer kasta, waxa maamulayey hay,ado xukuummada hoos yimaadda, waxaana caado ahayd in si joogta ah loogu shubto ama in ay toos ciidammadda amnigu xoogagga mucaaradada xadhig iyo xoog kaga hor-joogsaan cod-bixinta. Xisbiyada qaarokood, sida ka Ikhwaanu-Lmuslimiinta, sidooda ayaa jiritaankooda loo xarrimay. Ururrada bulshada ayaga waxaa ka soo hadhay oo jiritaan dhawran lahaa kuwo uu talisku sameeyey iyo kuwo markii ay quturi kari waayeen sidooda isu dhiibay. Sidaas ayuu, had jeerba, xukunka diktaatoorka ahi bulshada uga dilaa awoodda is-hogaaminta gudaheeda, taas oo ay xilliyada qalalaasaha siyaasadeed, ku ilaalin lahayd jiritaanka midnimadeeda u na fududayn lahayd aayo-ka-tashigeeda.

Xaaladdan oo kale waxay bulshada ku abuurtaa kalsooni-darro kaga dhacda magacyada hoggaanka jira dhammaantii. Waxaa dhacda in dadweynuhu noqdo qubane kala daadsan oo aan lahayn cid u arrin-qaadda oo loogu hagaagi karo taladiisa. Casharkani waa mid dhacdooyinkii Masar iyo dalalka kale oo carbeedba laga akhrisanayo. Markii ay runi run timid, intii xisbiyo iyo siyaasiyiin magac leh jirtay waxay noqdeen kuwo daba socda kacdoonka dhadweynaha, aanse wax raadayn ah ku lahayn dhacdooyinka socda. Ayaga oo saaxadda jooga oo magacyadii xisbiyadii macaaridka ahaa sita, ayey hadda na si cad u muuqatey in aanu kacdoonku hoggaan midaysan lahayn. Waxaa suuro-geli weydey in xisbiyada iyo siyaasiyiinta mucaaridka ahi ay ugu yaraan yeeshaan mowqif midaysan iyo af-hayeen mid ah. Soddon sano iyo ka badan, ayuu taliskii diktaarooriga ahaa u nacay maalin keli ah inay kulmaan oo ay istiraatiijiyad siyaasadeed iyo hawl-gal siyaasadeed oo midaysan yeeshaan. Waayo xukunka diktaatoorka ahi ma oggola dad kulma oo ka wada hadla ajendo u gooni ah iyo wax aanu jeclayn. Sida uu ayaga u kala gooyey ayuu dadka na uga go'doomiyey; waa sababta ka dhigtay kooxo aan dadweynaha xidhiidh la lahayn oo aan dhawaqoodu dhegaha dadka ku dhacaynin. Xaqiiqada meesha ku jirta ee ka muuqatay waxay tahay, keli-talintu waxay dalkeeda ka dishaa oo ay suuradiisa tirtaa quwad asaga beddeli karta oo dalka burbur ka baajin karta. Bal u fiirso maanta waxa ka taagan Suuriya oo ah dal xadaaro qoto fog leh, taariikhda dawladnimona ay xididdo dheer ku leedahay. Intii ururro siyaasadeed iyo bulsheed jirtay iyo intii uu dalku lahaa aqoonyahanno iyo culumo oo dhammi u ma dhisna hannaan ay ku noqon karaan quwad xukunka jira beddeli karta. Isla ifafaalahaas ayaa si weyn uga muuqda Yaman na. Masar waxay ku badbaadday Xoogga Dalka(Millateriga) oo mowqif midaysan ka qaatay taliskii Xusni Mubaarak, aakhirkii na, markii arrinku jiqda noqday, ku tallaabsaday in Golaha Hoggaanka Xoogga Dalku uu awoodda la wareego ilaa inta laga qabanyo doorasho ee xukun madani ahi ka dhismayo. Waa ta aan ka dhicin Suuriya oo ciidanka xoogga dalku qummaati u raacay xukunka Bashiir Al-Asad.

Mushkiladdani carrada soomaalida waxay ku leedahay barbar-oolkeeda shaabaha. Bishii Oktoobar 21keedii, sannadkii 1969kii, ayuu Soomaaliya ka dhacay afgembigii uu haggaaminayey Maxamed Siyaad Barre. Isla bayaankii u horreeyey ee uu soo saaray, ayuu ku dhawaaqay in uu tirtiray golayaashii baarlamaanka iyo xukuumadda; xisbiyadii siyaasadda iyo ururradii shaqaalaha iyo bushada dhammaantood; waxaa kale oo uu ku dhawaaqay in laalay dastoorkii dalka. Laba toban-guuro uu dalka ku xukumaya dab, xoog iyo bunduq, wuxuu abuuray xisbi uu leeyahay, iyo ururro

Copyright © 2011 WardheerNews.com

macrafoon u ah keli-taliyaha iyo taliskiisa. Maalintii uu meesha ka baxay ee la riday dawladdii la odhan jiray Soomaaliya dib looma hayyo. Xukunkii diktaarooriga ahaa sidii uu u dalka uga dilay hoggaan iyo hab-dhismeedyo madax-bannaan oo dadweynhooda toos ugu xidhan, ayuu dalkii u burburay; waayo waxaa la waayey hoggaan rayid ah oo magaca dalka ku midaysan oo dadka mideeya. Casharka soomaaliland iyo soomaali ba halkan ugu jiraa waa kaalinta xoogga millateriga.

Dhaqan-dhaqaale aad dib ugu dhacsan iyo bulsho ku filqsan oo ku kala go'doonsan is-ahaanshihii qabaa'il, uuna ku hardamayo hoggaan siyaasadeed oo loollan qabyaaladeed ku dhisan, ayaa waxaa ka dhismay ciidan hubaysan oo leh dhisme qaran loona carbiye hannaanka ciidan dagaal oo casri ah. Halista uu ciidankaasi ku noqon karo bulashada waxay ahayd afgembi; waa na tii uu keli-taliskii Siyaad barre ku yimid. Geesta kalese ciidankaasi waxa uu ahaa hay'ad hannaan qarannimo leh uu dadka sooaamaalidu wadaagay. Haddii uu dhismaheedii qaran sii jiri lahaa dhibaatooyin badan oo ay keli-talintii Syaad Barre dadka u geysatay, sida xasuuqii oo kale, u ma suuroobeen, ugu dambaytiina dalku sidan u ma dumeen. Dhibaatadu waxa ay ahayd cidankaasi, ka dib dagaalkii 1977k/1978kii, si qorshaysan buu xukunkii Siyaad barre u baabiiyey, wuxuu na ku dambeeyey cutubyo ibtirsiin qabiilo isku xidho oo ka kooban qolooyin uu Siyaasad Barre, hiilo tolliimo ugu tiirsan yahay. Sidaas darteed, markii aakhirkii keli-taliskii dumay ciidanka qaranku wuxuu ahaa wax aan jirin.

Taliskii diktaatooriga ahaa ee Siyaad Barre, wuxuu ku sababayn jiray af-gembigii 21kii Oktoobar, 1969kii, xaaladdii "fowdada ahayd ee ka dhalatay" xisbiyadii iyo ururradii faraha badnaa ee dalka ka jiray, runtuse waxa weeye fowdo iyo sharci-darro waxay la xidhiidhaa oo ay ka dhaltaa talo-maroorsiga laftiisa; fowdada ku dhacday dalkii la odhan jiray Soomaaliya na waxaa asal u ahaa Xukunka diktaatooriga ah. Meel xorriyad iyo dimoqraaddiyad siyaasadeed ka jirto ayuu sharci socdaa oo lagu dhaqmaa; ka mana dhacdo colaad aan demeyn iyo xaalad dawlad la'aaneed oo joogto ahi. Waa ta ay Soomaaliland maanta kaga duwan tahay Soomaaliya.

Ugu dambayn, cashar kale oo lama-dhaafaan ahi waa ahamiyada is-ahaanta ummaadeed ee ku dhisan ku-dhaadashada magaca dalka. Dadka Masar waxa isku xidhay ee ay halgan midaysan ku galeen waa magaca dalka ee Masar; waxay giddigood siteen oo ruxayeen calanka qaranka. Waxaa ka muuqday kal-gacaylka iyo lexo-jeclada ay dalkooda u hayaan. Taas ayaa midaynaysay oo ka hor-joogsatay isku-dayadii taliska ee ahaa in uu fidno dadweynaha dhexdiisa ka abaabulo. Waxaa lagu xusuusanayaa, dhibaato kasta oo soo martay, sida Soomaaliya ugu guul-darraysatay in ay magaca dalka ku midowdo oo isugu hiiliso oo dhibaatooyinkeeda ku xalliso, aayaheeda na uga tashato. Danqashada qabiil ayaa dabool madow ka saaraya dal iyo dadnimo ba.

Qore: Rashiid Sheekh Cabdillaahi (Gadhweyne)
Email: inacabdillaahi@yahoo.com

Copyright © 2011 WardheerNews.com